



# HABKA FAALLOOYINKA DADWEYNHA EE SAMP

Waxaa la filayaa in gobolka Puget Sound ay ku kordhaan hal milyan oo qof oo dheeraad ah marka la gaaro 2035. Qorshaha guud ee Garoonka Waara (SAMP) waa qorshaha isbeddelada lagu samayn doono garoonka diyaaradaha ee Seattle-Tacoma International Airport (SEA) si loogu diyaargarooobo baahida mustaqbalka ee la saadaaliyay. SAMP waxay aqoonsanaysaa 31 Mashruuc oo mudnaanta dhow (NTPs) oo loogu talagalay in lagu hagaajiyo waxtarka, badbaadada, helitaanka garoonka, iyo xarumaha taageerada ee diyaaradaha iyo garoonka. Haddii NTPs la ansixiyo, waa la dhammaystiri doonaa ama dhismihiisa waa lagu guda jiri doonaa marka la gaaro 2032.

SAMP iyo habka baaxadda ee dib u eegista deegaanka ayaa la dhameeyay 2018. Hadda, Xeerka Siyaasadda Deegaanka Qaranka (NEPA) Qiimaynta Deegaanka (EA) iyo muddada faallooyinka dadweynaha ayaa socda SEA's SAMP waxay ku talisay 31 NTPs

Dhammaadka xilliga faallooyinka ee Diisambar 13, 2024, dhammaan faallooyinka la helo waxaa dib u eegi doona oo tixgelin doona FAA iyo Dekedda inta lagu jiro diyaarinta kama dambaysta ah NEPA EA. Jawaabaha faallooyinka waxaa lagu dari doonaa EA kama dambaysta ah.

## WAXBADAN KA BARO

- Booq Mareegteena mashruuca oo ah [www.sampntpenvironmentalreview.org](http://www.sampntpenvironmentalreview.org)
- Iskadiiwaangeli warsidahayaga iimaylka adiga oo dooranaya sanduuqa ogeysiinta Qorshaha Guud ee Garoonka diyaaradaha ee ka hooseeya qaybta "Wararka Deegaanka ee joogtada ah" ee: <https://subscribe.portseattle.org/publications>.

## SIDA FAALO LOO BIXIYO

Ka faalloodka qabyo-qoraalka EA waa hab muhiim u ah dadweynaha si ay uga qaybqaataan geeddi-socodka dib-u-eegista deegaanka oo ay gacan ka geystaan habka go'aan qaadashada. Dekadda waxaa ka go'an hab la heli karo, oo la fahmi karo habka faallooyinka dadweynaha. Muddada faallooyinka dadweynuhu waxay furan tahay Oktoobar 21 illaa Diseembar 13, 2024.

Xubnaha dadweynuhu waxay awood u yeelan doonaan inay dib u eegaan macluumaadka lagu turjumay lix luuqadood oo ay soo gudbiyaan faallooyinka inta lagu jiro xilliga faallooyinka mid kasta oo ka mid ah shirarka dadweynaha ee hoos ku taxan, onlayn, iimayl, ama boostada caadiga ah. Dukumeentiga waxaa laga heli doonaa mareegaheena iyo maktabadaha dadweynaha ee Burien, Des Moines, iyo SeaTac. Faallooyinku waa inay bixiyaan tafaasiil ku filan hay'adda si ay u fahamto booska faallooyinka iyo sababta arrimaha la soo qaaday ay muhiim ugu yihiin habka go'aan gaarista.

U soo gudbi faallo dadweyne mid ka mid ah afarta kulan ee dadweynaha:

- **Talaado, Noofambar 12**  
Dugsiga Hoose Wildwood (Federal Way), 6 galabnimo - 8 fidnimo
- **Arbacada, Noofambar 13**  
Dugsiga Sare ee Mount Rainier (Des Moines), 6 galabnimo - 8 fidnimo
- **Khamiis, Noofambar 14**  
Dugsiga Sare ee Highline (Burien), 6 galabnimo - 8 fidnimo
- **Sabti, Noofambar 16**  
Dugsiga Hoose ee McMicken Heights (SeaTac), 10 subaxnimo - 12 galabnimo



Ku soo gudbi faallo dadweyne onlayn iyada oo loo marayo mareegahayaga ama adoo noo soo diraya iimayl:

- iimaylka: [samp@portseattle.org](mailto:samp@portseattle.org)
- Mareegteena: <https://www.sampntpenvironmentalreview.org/>

Ku soo gudbi faallooyinka dadweynaha boosta:

Boostada: Mr. Steve Rybolt  
Dekedda Seattle  
Duulimaadyada Deegaanka iyo Joogteynta  
P.O. sanduuqa 68727, Seattle, WA 98168

## XUSUUSIN MUHIIM AH

Kahor intaadan ku darin magacaaga, ciwaanka iyo lambarka taleefoonka, iimayl ama macluumaadka kale ee aqoonsiga shakhsi ahaaneed ee ku jira faallooyinkaaga, waxaa lagula talinayaa in dhammaan faallooyinkaaga – ay ku jiraan In kasta oo aad naga codsan karto faallooyinkaaga inaan ka joojino dib u eegista dadweynaha macluumaadkaaga aqoonsiga shakhsi ahaaneed, ma dammaanad qaadi karno inaan awoodno inaan sidaas samayno.

La cusbooneysiisay Noofambar 11, 2024

